

TALLAALKA KA HORTAGO JADEECADA, FAAYRUSKA QUMANKA IYO JADEECADA RUBELLA (TALLAALKA MMR)

Jadeecada

Waa cudurka ugu halisan ciyaalnimadeena. Cudurka aad ayuu u faafaa. Kuwa ka mid ah kuwa ku soo koray inta aan la helin tallaalka, in ka badan 99 % waxaa ku dhaco jadeeco. Cudurka wuxuu ku bilawdaa astaamaha sida-qabow iyo qandho sareyso, oo ay la jiraan finan. Jadeecada badanaa waxaa la jiro dhibaatooyin sida wareentada, iyo dhag bararka dhexe. Natiijooyinka halista ah sida caabuqa maskaxda (jeermiska maskaxda), dhaawaca joogtada ah ee maskaxda iyo dhimashada dhacdo. Aduunka oo dhan, qiyaastii 120,000 oo dad ah ayaa u dhinta jadeeco sanad walbo, badankood carruur ah. Dilaacida jadeecada oo ay dhimasho la jirto ayaa sidoo kale ku dhacdo dadka aan tallaalneen oo qeybteena aduunka ah.

Faayruska qumanka

Waa cudur faayrus keeno oo sababo qandho iyo barar oo dhabanka dhagta horteeda ah. Dhibaatooyinka ugu badan waa faayruska qumanka ee jeermiska, taas oo sida caadiga ah u gudbiyo iyada oo aan waxyeelo joogta ah gaarsiin. Dhibaata ugu halisan waa dhagoolnimada joogtada ah. Hadii wiilasha uu ku dhaco faayruska qumanka qaangaarka ka dib, faayruska wuxuu weerari karaa xaniinyaha iyo wuxuu keeni karaa in uu yareeyo dhalimada, laakin ku dhawaadkii ma ahan dhalaysnimada.

Jadeecada rubella

Waa cudur qafiif ah oo keeno qandho iyo finan oo labadaba ah carruurta iyo dadka weyn. Hadii naag uur ah uu ku dhaco jadeecada rubella, cudurka wuxuu u keeni karaa canuga aan dhalanin dhaawac halis ah. Halista curyaannimada waa in ka badan 80 % oo cudurka bilaha ugu horeeya ee uurka ah.

Micnaha ugu weyn ee cudurka oo naagaha uurka leh ah wuxuu la xiriira carruurta qabto cudurka. Cudurada dilaaca qaarkood, nimanka aan tallaalneen ayaa illaha cudurka ahaa. Sidaas darteed, waa muhiim in carruurta oo dhan la tallaalo.

TALLAALKA MMR

Tallaalka ka hortaga jadeecada, faayruska qumanka iyo jadeecada rubella waxaa loo yaqaan magaca tallaalka MMR. Magaca la soo gaabiyay wuxuu ka yimid magacyada cudurada: Jadeecada, Faayruska qumanka Jadeecada Rubella. Tallaalka waa tallaalka isku jir ah oo wato nolol, daciifiya jadeecada, faayrusyada qumanka iyo jadeecada rubella. Garoojada koowaad ee MMR ka dib, taas oo sida caadiga ah la siiyo da'da 15 ka bilood, in ka badan 90 % oo kuwa la tallaalay ah way ilaalsanyihiin sanooyin badan, laga yaabo nolasha oo dhan. Garoojo cusub ayaa la siiyaa da'da 12 ka si loo hubiyo ka hortaga 10 % ee ugu dambaysay iyo si loo hubiyo ka hortaga waqtiga-dheer. Halis ma ahan in la tallaalo qof mar hore qabo hal ama in kabadan oo cudurada ah.

Maadaama tallaalka MMR ay tahay tallaalka nolasha daciifiya, waa muhiim in kuwa masuulka ka ah canuga in ay ugeysiyaan kaalisada tallaalka ka hor hadii canuga ay haysto difaac daro jirka ah ama uu daawo qaato.

Saameynta-dhinaca:

Xannuun kooban, gaduudashada iyo barrarka oo dhinaca tallaalka ah ayaa dhacdo. Hal ama Labo isbuuc oo tallaalka ka dib, carruurta qaarkood waxaa ku dhaco aastaamo yar oo cudurka laga tallaalay ah, laakin tani waxay ku dhacdaa 20 kiiba 1 dhif ah. Aastaamaha ugu weyn waa qandho iyo finan. Cudurka iyo tallaalka faayruska ma la kala qaado. Dhibaatooyinka dhacdo marmar cudurada kadib ama aan dhicin tallaalka ka dib.

1997 dii, waxaa la soo jeediyay xaqiijin ah in tallaalka MMR uu keeni karo curyaannimada maskaxda. Tirooyin ah daraasadaha ugu weyn oo ilaa iyo hadeer la sameeyay oo dhammaan si xoogan u tilmaamayaan in tallaalka MMR uu san keenin curyaanimada maskaxda ama waxyeelo kale oo maskaxda ah.